

Wargelin waalidiinta ku socota 17.4.2020

Xiriirka waxbarasho-horaadka ee cunugga guriga jooga

Asxaabta iyo dadka waaweyn ee kooxda waxbarasho-horaadku waa u muhiim cunugga xittaa marka uu guriga joogo. Waxbarasho-horaadka ayaa inta xaaladdan gaarka ah lagu jiro carruurta guryaha joogta siinayaa fursad lagula xiriirayo. Macallimadda barbaarin-horaadka ee qaabilsan waxbarashada barbaarin-horaadka ayaa todobaad kasta fiidiyow kula xiriiraysa carruurta guryaha joogta.

Fiidiyowga waxaa lagula xiriirayaa kooxda yar ee ka kooban 3-5 cunug oo dugsi-horaadka ku jirta. Wakhtigan wadajirka ah marka lagu jiro ayuu wuxuu cunuggu ka hadli karaa, sida uu xaalkiisu yahay. Macallimadda barbaarin-horaadka ayaa hagaysa wakhtiyada fiidiyowga lagu jiro, waxaana carruurta lala sameyn karaa casharo ama wadajir ayaa loola heesi karaa, dheeli karaa ama wax loola akhrin karaa. Carruurta xittaa waxay soo bandhigi karaan waxyaaba ay rajaynayaan in lagu soo daro wakhtigan wadajirka ah.

Waxaan ku talinaynaa in xiriirka fiidiyowga lagu sameeyo ablikeeshinka Teams, kaas oo isticmaalkiisa ay macallimadda barbaarin-horaadku waalidiinta ka caawinayso. Haddii la rabo, waxaa xiriirka lagu sameyn karaa xittaa khadka telefoonka. Xiriirka fiidiyowga ee Teams waxaa lagu sameyn karaa kambuyuutarka, tableetiga ama telefoonka.

Wadahadallada qorshaha waxbarasho-horaadka waxaa inta guga lagu jiro lagu sameynayaa khadka telefoonka ama fiidiyowga. Sida macluumaadka dugsiyada loogu wareejinayo waalidiinta ayaa lagala heshiinayo marka wadahadalka lagu jiro.

Halkan ayeey ku lifaaqan yihiin tilmaamaha waalidiinta loogu talagalay ee ku saabsan sida fiidiyowga la iskula xiriirayo.

Xiriirka barbaarin-horaadka ee cunugga guriga jooga

Xannaano-maalmeedyada iyo xannaano-maalmeeddka qoyska ee barbaarin-horaadku waa shaqeynayaa xitaa iyadoo ay jirto xaaladdan gaarka ah. Qiyaastii boqolkiiba 20 ayaa carruurta ka joogta maalin kasta xannaano-maalmeedyada.

Macallimadda barbaarin-horaadka ayaa la xiriiraysa carruurta guryaha joogta ugu yaraan halmar ama haddii loo baahdo mara badan inta guga lagu jiro. Xiriirka intaas ka badan ayaa cunugga lala yeelan karaa, haddii ay waalidku sidaas soo jeediyaan. Haddii ay waalidiintu qabaan su'aalo ku saabsan barbaarin-horaadka, maamulaha xannaano-maalmeedka iyo shaqaaluhuba waa diyaar markasta waana la helayaa.

Wadahadallada qorshaha barbaarin-horaadka waxaa loo wareejinayaa sidia caadiga deyrta. Haddii loo baahdo, wadahadallada waxaa guban dhexdiisa lagu qaban karaa khadka telefoonka ama fiidiyowga.

Satu Järvenkallas

Maamulaha barbaarin-horaadka

Waxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada